

## Employee Foodborne Illness Video Script – Somali

---

### Fiidiyowga Baaritaanka Xanuunada Dillaaca: Shaqaalaha

Shaqaale ahaan waxaad filan karto inta lagu guda jiro baaritaanka xanuunka cuntada ka dillaaca

Haddii aad daawaneysid fiidiyowgaan, maareeyahaaga ayaa kugu wargaliyay xanuun ka dillaacay cuntada, iyo baaritaan ku saabsan xanuunkan oo ay wadaan shaqaalaha Waaxda Caafimaadka.

Xanuunka cunnada ka dillaaca waa midka ay ku xanuunsadaan laba qof ama in ka badan oo isla cunto wada cunay.

Xanuunka cunnada ka dillaaca wuxuu sababi karaa matag iyo shuban ama calaamado kaloo daran oo horseedi kara in qofka isbitaal la dhigo ama uu u dhinto.

Xanuunka cunnada ka dillaaca wuxuu saamayn karaa hal makhaayad oo keliya - sida marka cuntada aan si bedqab lahayn loo diyaariyo, ama shaqaaluhu soo shaqo tagaan iyagoo xanuunasan.

Sidoo kale, xanuunka cunnada ka dillaaca wuxuu saamayn karaa ilaha cuntada laga soo iibsado - sida cunto wasakhaysan oo dad badan ku xanuunsadaan kuwaasoo ku cunay meelo kala duwan.

Xanuunadu way faafi karaan xitaa marka la raaco hab-dhaqamada wanaagsan ee fayidhowrka cuntada.

Waa kuwan waxaad filan karto hada ka dib.

Qof ka socda waaxda caafimaadka ayaa kula soo xiriiri doona si uu kuu weydiyo su'aalo ku saabsan waajibaadkaaga shaqo, maalmaha aad shaqaysay, iyo haddii aad dhawaan dareentay wax xanuun ah.

Wareysigaani wuxuu badanaa qaataa 5-10 daqiiqo.

Wuxuuna naga caawinayaa inaan go'aan ka gaarno sida uu xanuunkani u faafay, iyo in la joojiyo inuu ku sii faafo shaqaalaha ama macaamiisha.

Mararka qaar dadku waxay faafiyaan xanuunka cuntada ka dillaaca iyagoon ogayn in xanuun hayo.

Waxaanu danayneynaa joojinta in xanuunkani sii faafo ee ma doonayno inaan cidna eedayno.

Jawaabahaagu waa qarsoodi oo lalama wadaagi doono cid ka baxsan dadka xanuunka baaraya.

Wareysiga waxaa lagaaga qaadi karaa taleefanka ama shaqadaada. **"Laakiin mar walba wuxuu waraysigu noqon doonaa mid gaar ah."**

Halkan waxaa ku yaal macluumaad sharci ah oo nalooga baahan yahay inaan kula wadaagno wareysiga ka hor.

**QARSOODI:** Macluumaad kasta oo aad na siiso oo naftaada ku saabsan (oo ay ku jiraan baaritaanada caafimaad) waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin xog gaar ah. Saraakiisha caafimaadka bulshada ee ku howlan baaritaanka xanuunkan dillaacay oo kaliya ayaana arki kara xogaha gaarka ah. Fasax ma kaaga haysannaa in xogta aad na siiso la wadaagno maamulka shaqaalaha ee goobta aad ka shaqayso?  **HAA**  **MAYA**

**IKHTIYAAR:** Kuma qasbanid inaad su'aalahaan ka jawaabto. Laakiin, jawaabahaagu waxay naga caawinayaan inaan fahamno sida uu xanuunkani u dillaacay iyo ka hortega inuu sii faafo. Haddiise aadan su'aalaha ka jawaabin, waxaa lagaa saari doonaa shaqada maadaama aanaan ogayn inaad xanuunka u gudbin karto dadka kale.

Ma ka jawaabi doontaa su'aalo kooban?  **HAA**  **MAYA**

Waxyaabaha aan ku waydiin karno ayaa ah:

- Magacaaga
- Da'da
- Cinwaanka
- Telefoon #
- Magaca shaqada

Macluumaadkan waxaa la isticmaalayaa oo keliya haddii aan u baahan nahay inaan kaala soo xiriirno xanuunkan dillaacay ama u baahanno inaan guriga kuu keeno aaladaha saxarada la baarayo la isaga qaado.

Waxaan sidoo kale wax kaa weydiin doonaa wixii astaan xanuun ah ee aad dhawaan isku aragtay sida:

- Matag
- Shuban
- Saxaro dhiig leh
- Calool xanuun
- Lalabbo
- Qandho/Xummad

Jadwalkaaga shaqada oo ku hor yaalaa wuxuu kaa caawin doonaa inaad xasuusato markaan ku soo wacno maalmaha aad shaqaysay, ama maalmaha aad xanuun dareentay.

Waxaan kaloo wax kaa weydiin doonnaa waajibaadkaaga shaqo iyo haddii aad wax ka cuntay cuntooyinka shaqaalaha la siiyo.

Maamulahaagu ha noo soo sheego haddii aad rabto in wareysiga lagaa qaado luuqad aan Ingiriisi ahayn. Waxaan heli karnaa kormeere luuqaddaada ku hadla ama qof kuu turjuba.

Waxaan rajeyneynaa inaan dhowaan kula soo hadalno.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir waaxda caafimaadka ee deegaankaaga ama Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada.

For reasonable accommodations or alternative formats please contact the Health Department at 612-673-2301 or [Health@minneapolisnmn.gov](mailto:Health@minneapolisnmn.gov). People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850. Para asistencia 612-673-2700  
Rau kev pab 612-673-2800 - Haddii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500.